




INTERVIEW PREPARATION

# UDIYAAR GAROWGA KULANKA-WARAYSIGA ISBONSARKA QAXOOTIGA

Kulan-Waraysiga lala yeelanayo sarkaalka fiisada u xil saran Kanada ayaa ah talaabo muhim u'ah go'aan ka gaarida codsiyada isbonsorka qaxootiga. Codsadayaasha ayaa waraysiga loogu wacaa iyadoo loo dirayo warqad rasmi ah ama email ama taleefoon. Ulajeedada waraysiga ayaa waxay tahay in la ogaado in uu qofka codsanayo isbonsarka qaxootinimo uu yahay mid u qalma loona ogolaan karo barnaamijka dib udajinta isbonsarka khaaska ah ee qaxootiga iyo in dib u dajinta Kanada ay tahay habka ugu haboon ee xal u noqon karto xaalada codsadaha.

Maadaamaa go'aanka sarkaalka fiisada muhiimadiisu ku xiran tahay natiijada waraysiga lala yeesho codsadaha hadana dukumentigaan ayaa bixinaya talooyiin ku saabsan sida ugu haboon ee loogu diyaar garoobo waraysiga lala yeelanayo sarkaalka fiisada kanada iyo waxa la sameeyo ka hor waraysiga, xiliga waraysiga iyo kadibba.

## KULAN-WARAYSIGA KA HOR

si taxadar leh dib u eeg dhamaan koobiga ama foomamka codsiga iyo dhamaan waraaqihii lagu lifaaqay ee ku saabsanaa xaaladaada ee loo gudbiyey sarkaalka fiisada (Safaarada). Hadii aadan koobiyada ama dokumentiyada haynin, fadlan si dag dag ah u'ogaysii damaanad-qaadayaashaada si ay kaaga caawiyaan helitaanka koobiyadaas. Marka aad dib u'eegeysid foomamka codsiga iyo waraaqaha lagu lifaaqay ee taageeraya dacwadaada, fadlan ka taxadar arimahan soo socda:

- In qoyskaaga wali ka kooban yahay tiradoodii sidii loogu xusay foomka dacwada? Hadii uu is badal ku yimaado (sida; guur, dhalasho ama dhimasho) oo aysan ku qornayn foomamka, fadlan u sheega sarkaalka fiisada (iyo damaanad-qaadayaashaada) arinkaas waraysiga hortiisa.
- In foomamka codsiga lagu xusaa DHAMAAN reerka iyada ood xusaysid xitaa kuwa aanan war laga haynin ama loo malaynayo in ay geeriyoodeen. Hadii aad ogaatid qaar kamid ah reerkaaga ( kuwa codsiga kugula jira iyo kuwa aanan kugula jirinba) in aysan foomamka kujirin, fadlan si deg deg ah qoraal kula socodsii sarkaalka fiisada iyo damaanad-







qaadayaashaada.

- Hubso in warbixinta ku sugan codsiga ay tahay mid **sax ah**. Hadii aad khaladaad ku aragtid foomamka codsiga, fadlan ogaysii sarkaalka fiisada iyo damaanad-qaadayaashaada ka hor kulaka-waraysiga .
- Waa in aad xaqiijisaa in aad gudbisay dhamaan warbixinada kuhaboon ee taageeraya kiiskaaga.

## Tusaalooyinka dokumentiyada caawiya codsiyada

- ✓ Cadaymaha sugaya dacwadaada qaxootinimo (maqaalo-jaraa'idka, maqaalo ama cadaymaha , oraahyo ay bixiyeen saaxibadaa iyo qoyskaaga, warbixinada booliska iyo hool wadeenada caafimaadka I.W.M)
- ✓ Dokumentiyada tusinayo waxii dhib ah ee soo gaaray dad kale oo xaaladaada oo kale soo maray ( Tusaale ahaan, qaraabo loo aqoonsaday qaxootinimo);
- ✓ Dhamaan dokumentiyada iyo waraaqaha aqoonsiga shaqsiyadeed.
- ✓ Dokumentiyada la xiriira xaaladaada guur iyo reerka (Shahaadooyinka guur iyo furiinka iyo dhalashada caruurtaada)
- ✓ Dhamaan dokumentiyada iyo waraaqaha ka soo baxay UNHCR iyo dowladda ku marti galisay.
- ✓ Dokumentiyada cadaynaya dhibka kugu haysta wadanka xilligaan aad dagan tahay.
- ✓ Dokumeentiyada muujinaya dhibaatooyin caafimaad iyo mid maskaxeed (sida warbixinada dhaakhaatiirta).

### Dacwaddaada qaxootinimo waa in aad taqaanaa

Waxaa la wada ogsoon yahay in sababaha ugu badan ee codsiyada lagu diido ay tahay in aad sheegatid xog ama warbixin khilaafsan mida kuu qoran. Tusaale ahaan, marka ay kala duwanaadaan warbixinada xilliga waraysiga iyo tii ku qorneed foomamka codsiyada. Sidaas darteed, waa in aad si taxadar leh u **aqrisid dacwadaada shaqsiyadeed (Foomka 2-aad)** ee loo gudbiyay sargaalka fiisada kana kaqayb ahayd codsigaaga qaxootinimo. Marka aad dib u'eegaysid dacwadaada, fadlan fiiro gaar ah sii arimahan soo socda:

- Hubso in dhamaan dhacdooyiinka ku qabsaday (iyo kuwa qabsaday qoyskaagaba) ay yihiin **kuwa run ah** oo si rasmi ahna u taariikheysan.
- **Si wacan u xasuusnoow dacwadaada** oo Waxaa wanaagsan in aad samaysid **diiwaan galin faafaahinada muhiimka** ah ee khuseeya **waqtiga, taariikhda iyo goobta** dhacdooyiinka ku dhacay reerkaaga iyo shaqsiyada ama ururada lala xiriirinayo xaaladaada iyo dacwadaada. Waayo waxaa laga yaabaa in aad faafaahinta xogaha ilaawdid xiliga waraysiga.






# INTERVIEW PREPARATION

- **Hakaa dhagaysto dacwadaada qof aad ku kalsoon tahay**. Qofkaas wuxuu ku waydiin karaa su'aalo la xiriiro noloshaadii markii aad wadankaaga joogtay iyo sababihii aad kaga soo qaxday.
- Hadii aad wax qaladaad ah ku aragtid dacwadaada qaxootinimo ama aad aragtid in ay dacwadaadii wax ka kala maqan yihiin sida dhacdooyin iyo tariikho ogaysii sarkaalka fiisada iyo damaanad-qaadayaashaada inta aan la gaarin kulanka-waraysiga.
- Hadii aad doonaysid in aad **ku dartid waarbixin** kusaabsan dhacdooyin la xiriira waxii kugu dhacay ama ku dhacay qoyskaaga, oo aanan ku xusnayn dacwadaada shaqsiyeed, fadlan la socodsii sarkaalka fiisada iyo dadkii ku isbonsaray adigoo qoraal dag dag ah kula xiriiraya.

## XILLIGA KULANKA-WARAYSIGA

Xafiiska fiisa bixinta Kanada ayaa ku ogaysiini doona taariikhda, waqtiga iyo goobta waraysiga ka dhacayo. Ha moogaanin taariikhda iya goobta uu ka dhacayo kulanka-waraysigaaga.

- Waa in aad timaadaa goobta laguu cayimay waqtiga iyo waliba maalinka laguu qabtay. Hasoo daahin oo isku day in aad timaadid ugu yaraan nuso-saac kahor waqtiga kulanka-waraysiga.
- Waxaa ku wareeysan doono sarkaalka fiisada Kanada. Hadii aad codsatay turjumaan, turjumaan ayaa sidoo kale qolka ku diyaar noqonaya.
- Sarkaalka fiisada ayaa ku waydiin doona waxii ku saabsan **qaabka iyo sababaha keenay dalabkaaga qaxootinimo iyo xaalada wadankaagi iyo kan aad magan galyada u joogtid**: Sababta aad uga soo tagtay wadankaagii hooyo iyo waliba sababta aadan ugu laaban Karin iyo sababta aadan usii joogi Karin wadanka aad ku sugan tahay. Waxaa kale oo suurta gal ah in lagaa waraysto waxbarashadaadii, xirfadaada shaqo, qoyskaaga noloshiisa, aqoontaada faransiiska iyo ingiriiska iyo aqoontada Kanada iyo xiisaha aad u qabtid inaad Kanada tagtid.

### Dokumeentiyada loo qaadato kulaka-waraysiga

Fadlan soo qaado dhammaan dokumeentiyada asalka ah ee aad haysato, sida:

- Warqadaha aqoonsiga ee adiga iyo dhammaan xubnaha qoyskaaga ee kugula jira codsigaaga.
- Dokumentiyada sugaya dacwadaada qaxootinimo iyo cabsida aad ka qabtid dhibaato kugu soo gaarto wadankaagii hooyo.







# INTERVIEW PREPARATION

- Haddii aad la imaadid dokumeentiyo cusub iyadoo lagu guda jiro kulanka-waraysiga, dokumentiyadaas oo aadan hore ugu soo gudbin xafiiska fiisa bixinta, waxaad u baahan doontaa inaad u sharaxdo sarkaalka fiisada sababta kaa hor taagneed inaad soo gudbisid kulanka-waraysiga ka hor.
- Haddii mid ka mid ah dokumeentigaaga aanu ku qornayn Ingiriis ama Faransiis, fadlan keen nuqul la turjumay.
- Haddii aadan haysan mid ka mid ah dokumeentiyada loo baahan yahay, fadlan u diyaar garow in aad u sharaxdo sarkaalka fiisada ah sababaha aadan u haysanin.

## Sidee loo dhaqmaa Xilliga Kulanka-Waraysiga

- Haka baqanin sarkaalka ka socda laanta socdaalka ee waraysiga kula yeelan doono**. Marwalba fiiri sarkaal ku waraysanaya** marka aad hadlaysid. Ha isku dayin in aad hoos fiirisid marka aad hadlaysid (marka laga reebo xilliyada aad xusuusanaysid dhacdooyinka dareenkaaga badalaya)
- Waa in aad **ku kalsoonaatid sarkaalka fiisada** oo aad kasiisid jawaabo **buuxa oo run ah** su'aashiisa/su'aasheeda. Intaa waxaa sii dheer, jawaabahaagu waa in ay noqdaan kuwa la fahmi karo oo la soo koob kooban.
- Hadii aadan fahmin su'aasha, haka xishoonin in aad waydiisid sarkaalka in uu ku celiyo ama qaab kale su'aasha kuugu dhigo.
- Ha buun buunin sheekadaada. Waa in aad **sheegta runta oo kaliya,** xitaa hadii ay kula noqorto mid fudud. Xusuusnoow, hadii aad dhiibtid xog been ah ama aad ka badbadisid waxay sababi kartaa diidmada codsigaaga.
- Ha u qaadan inuu sarkaalku ka warqabo waxyaabaha adiga si cad kuugu muuqda. Waa in aad sheegtaa **wax walbo** oo aad doonaysid in uu sarkaalka fiisada ogaado. Khaasatan marka ay timaado **dhaqamada iyo caadooyinka kuu gaar** ah ee khuseeya dacwadaada qaxootinimo.
- Hadii ay dad kamid ah **qoyskaaga** ku gula jiraan codsiga, waxaa xaqiijisaa in aad kahadashid dhamaan khatarta ay la kulmi karaan hadii lagu celiyo wadankooda hooyo. Tan waxaa kamid ah **khatarka qabsan karta carruurtaada.**
- Hadii aad horay u gudbisay **dokumeentiyo**, waad xusuusini kartaa sarkaalka fiisada in ay dokumentiyadaasi jiraan waadna tilmaami kartaa qaabka dokumeentiyadaas u kabi karaan sheekadaada.
- Waa in aad xaqiijisaa in aad u sheegtid sarkaalka fiisada hadii ay jiraan **isbedel xaga reerka ah.** Hadii aad goor dhow guursatay ama aad caruur dhashay, ogaysii sarkaalka fiisada. Hadii aadan sheegin reerkaaga waxa ku soo kordhay,






waxaa laga yaabaa in imaatinkooda dambe ee Kanada uu adkaado.

- Hadii dareenkaagu is badal ku yimaado (sida inaad murugooto) ama aad carootid oo aad mudo yar u baahatid in aad banaanka u baxdid si aad arimahaaga isugu duwatid, haka xishoonin ama haka cabsan in aad sarkaalka fiisada aad fasax waydiisatid.

- **Haka tagin qolka waraysiga adigoo aanan sheegin wax walbo** oo aad doonaysay in aad u sheegtid sarkaalka. Hadii aadan si buuxda usheegin dhamaan khatarta aad kala kulmaysid ama aad kala kulmi kartid hadii aad ku laabatid dalkaaga, waxaa laga yaabaa in uu sarkaalka fiisada gaaro go'aanka asagoon tixgalinaynin khatarahaas jirto.

## Lashaqaynta Turjumaanka

Hadii aadan ku hadlin Faransiis ama Ingiriis, turjumaanada ayaa ku caawini kara xilliga kulaka-Waraysiga. **Hadii ay noqoto in aad isticmaashid adeega turjumaan xilliga waraysiga xasuusnoow arimahaan soo socdo;**

- Hubso in aad si wanaagsan u fahmi kartid turjumaanka asagana kuu fahmi karo.

- Uga jawaab su'aalaha si faafaahsaan **suaal walbana kaga jawaab qayb qayb** si uu turjumaanku u turjumo erey walba oo aad sheegtid. Xusuusnoow turjumaanada looma ogolo in ay hadalkaaga soo koobaan ama ay qayb kamid ah hadalka ka tagaan.

- Haka baqin in aad sida runta ahi u hadashid marka aad horjoogtid turjumaanka adigoon eegeyn asalkiisa diineed, dhaqameed ama qoomiyadeed. Kaalinta turjumaanka ayaa ah in uu kaa cawiyo adiga iyo sarkaalka fiisada in aad isfahantaan. Turjumaanka ma saa'mayn karo go'aanka sarkaalka fiisada.

- Hadii aad u malaysid in uu turjumaanku sameeyay khalad ama uu warbixinta qaarkeeda meesha kasaaray, waa in **aad si deg deg ah ugu sheegtaa sarkaalka fiisada**. Haka cabsanin in aad turjumaanka ka dhex gashid hadalka, hadii aad doonaysid in aad saxdid qalad uu sameeya.

- Hadii aad hubsatid in turjumaanka lagu siiyay **uusan shaqo haboon qabanaynin**, fadlan **la socodsii sarkaalka fiisada si deg deg ah**. Tusaale ahaan, hadii uu turjumaanku ku hadlin kuuqadaada ama lahjadaada oo isfahan la'aan arinkaasi sababayo, si asluub leh u codso in laguu keeno turjumaan kale si deg deg ah**. Ha sugin ilaa inta waraysiga uu ka dhamaayo** in aad sheegtid tuhunkaaga ah in uu turjumaanka khaladaad sameeyay.

- **Hadii uu turjumaanku** si qaldan uu kaaga gudbiyo hadal aadan oran ama si qalad ah u fahmaan turjumaaka iyo






sarkaalka fisada waxii aad tiri, haka xishoonin ama haka baqanin in aad iyaga saxdid.

- Hadii aad tahay haweeneey turjumaankana yahay nin (ama aad tihiin kala jinsi) oo aadan doonayn in aad sheekadaada shaqsiyeed ku hor sheegtid, haka xishoonin ama haka baqanin in aad u sheegtid oo aad sarkaalka ka codsatid Turjumaan kula jinsi ah.

# KULAKA-WARAYSIGA WAXA KA DAMBEEYA

Sida caadada ah, sarkaalka fiisada ayaa go'aan gaaraya oo kuu sheegaya go'aankaasi marka uu waraysiga dhamaado. Hadii codsigaaga la ansixiyo, waxaa lagu siinayaa foomamka caafimaadka waraysiga dhamaadkiisa. Dhanka kale, waxaa dhacdo mararka qaar in uu sarkaalka fiisada u baahdo waqti dheeraad ah si uu go'aan u gaaro.

**Hadii aan lagu siinin foomamka caafimaadka waraysiga marka uu dhamaado**

- Waxaa haboon in aad diyaarsatid warbixin kooban oo ku saabsan waraysiga laga soo bilaabo xilligii aad soo gashay dhismaha kulan-waraysiga ka dhacay iyo in aad qortid dhamaan su'aalahii lagu weeydiiyay iyo jawaabihii aad kabixisay.
- Hadii aad u malaysid in uu wax isdaba mareen mudada waraysiga, tusaale ahaan hadii aad ilaawday in aad sheegtid dhacdooyin muhim ah, fadlan si deg deg ah qoraal ugula socodsii xaafiiska fiisa bixinta iyo damaanad-qaadahaaga.
- Hadii waraysiga gadaashiisa aad heshid **dokumeentiya cusub,** fadlan si deg deg ah ugu gudbi xafiiska fiisa bixinta iyo daamanad-qaadahaaga.

CANADIAN
ASSOCIATION FOR
IMMIGRANTS AND REFUGEES
406 - 461 CUMBERLAND AVE
WINNIPEG, MB CA R3B 3G3
+ (431) 777- 0115
INFO@THECAIR.COM